

TALAALKA COVID-19

SU'AALO IYO JAWAABO

Si aan u joojino aafadaan, waxaan u baahan nahay inaan adeegsano dhammaan farsamooyinkeena kahortaga. Talaalladu waa mid kamid ah farsamooyinka ugu waxtarka badan ee aad ku difaacayso caafimaadkaaga aadna uga hortagi karto cudurka. Tijaabooyinka ayaa muujinaaya in talaallada COVID-19 ay si wanaagsan ugu shaqeeyaan inay kaa difaacaan COVID-19. Qaadashada talaalka buuxa ee ka dhanka ah COVID-19 ayaa kaa caawin karta inaad xanuun xun ka qaadin haddii uu kugu dhaco COVID-19.

Sidee ayaan ku aburnay talaalka COVID-19 si degdeg ah?

Sidee ayaa degdeg loogu ansixiyay si ka dhakhso badan talaallada kale?



Talaalka COVID-19 waa mid badqab iyo waxtar leh. Aqoonta loo adeegsaday abuurista talaalka waxaa lagu saleeyay cilmi baaris socotay in ka badan rubuc qarni iyo sayniska. Talaalladaan waxay ka caawiyaan nidaamkeena difaaca jirka la dagaalanka fayraska keena COVID-19 haddii uu nagu dhaco mustaqbalka. Sidan ayay talaallo badan u shaqeeyaan!

Hanaanka Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA) gudaha Maraykanka waa mid adag. Dib u eegis adag ayaa lagu sameeyaa si loo hubiyo in talaalladu ay buuxiyaan cabirada badqabka iyo waxtarka.

Isha: cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/vaccines/distributing/steps-ensure-safety.html

Talaalku ma sababi karaa COVID-19, ma badali karaa DNA gayga, ma keeni karaa madhalaysnimo, ama ma igu durayaa aalada wax basaasta?



Talaallada laga isticmaalo Maraykanka (iyo aduunyada kale oo dhan) kuma jiraan fayras nool oo keena COVID-19. Kuguma ridi karaan COVID-19, ma badali karaan DNA gaaga, ama kuma sababi karaan ma dhalaysnimo. Talaallada KUMA jirto aalad wax basaasta ama dadka dabagasha.

Haddii aan horay u qaatay COVID-19 aan bogsooday, wali ma u baahan nahay talaalka?



HAA, waa inaad wali qaadataa talaalka COVID-19. Talaalku wuxuu kor u qaadaa falcelinta jirkaagu bixiyo si uu difaac fiican kuu siiyo.

Wixii xog dheeraad ah booqo:

cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/vaccines/vaccine-benefits.html

Waa maxay sababta aan u qaadanaayo talaalka COVID-19?



Talaalku waa mid badqab leh, waxtarna leh (85-95% ayadoo ku xiran noociisa), WAA BILAASH, waana qaabka ugu wanaagsan ee aan ku heli karno heerka caadiga ah ee nolosheena, wuxuu naga caawinayaa soo celinta ganacsigeena, iyo badbaadinta nafta.

Talaalka COVID-19 ma keenayaa dhibaatooyin ka dhasha?



Ciladaha ka dhalan kara waa calaamado caadi ah oo muujinaaya in jirkaagu dhisaayo difaac. Ciladahaan ka dhalan kara ayaa caadiyan kaa ba'aaya kadib 24-48 saacadood kadib. Ciladaha ka dhalan kara ee ugu badan waa murqo xanuun, qarqaryo, qandho, madax xanuun, lalabo, daal, xanuunka meesha lagaa duray, iyo finan ama bararka meesha cirbada lagu muday. Dadka qaar ayaa waajihi kara falcelinadaan halka kuwo aysan dareemin. Haddii aadan wax ciladaha ka qaadin talaalka, kama dhigna inaan jirkaagu dhisayn difaac. Qof kasta wuxuu leeyahay falcelin u gaar ah. Wacdaa dhakhtarkaaga si aad ugu sheegto aadna ugala hadasho ciladaha ka dhalan kara haddii aad walaac ka qabto.

Wixii xog dheeraad ah booqo:

cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/vaccines/expect/after.html



Xarunta Talaalka COVID-19 ee Degmada Onondaga: 315.435.2000
ama ka hel talaal lagu bixinaayo meel kuu dhow [vaccines.gov/search](https://www.vaccines.gov/search)

Qaadashada talaalka iyo raacida tallooyinka CDC si aad u difaacdo naftaada iyo dadka kale ayaa na siinaysa difaaca ugu fiican ee ka dhanka ah COVID-19.



ongovhealth
Onondaga County
Health Department
ongov.net/health · facebook.com/ongovhealth